

Nofeembar 15, 2024

KA ADKAANSHAHA CAQABADAHAA WAA SIDA XIDIGAAN ULA QABSADAY GUUSHA CIYAARTAN OO U GAARAY UNA DHIROGELIYAY

Kaliya 17 sanno jir, Najee Smothers wuxuu dib u qeexayaa waxa ay ka dhigan tahay in laga adkaado caqabadaha. Wuxuu ku dhashay cudurka laf dhabarka, Najee waxaa marwalba ka go'neyd inuu ku noolaado riyooynkiisa, iyadoon laga eegin caqabadaha ka jira marinkiisa. Ma jiraan wax ka joojiyay midkood xaaladiisa ama ka goynta lugta hoose isagoo sagaal sanno jir ah inuu noqdo ciyaaryahanka ugu fiicnaa ee uu noqon karo—socdaal siiyay aqoonsi iyo abaal marin caalami ah.

Oktoobartaan dhaaftay, Najee, oo ah xubin aan caadi aheyn oo ka tirsan kooxda kubada koleyga Kursiga curyaanka ee DeKalb Silver Streaks, ayaa la gudoonsiiyay Abaalmarinta Ciyaartoyga ugu Qiimaha badan Guud ahaan Horyaalka Georgia ee *Adapted Sports Programs* ee sannadlaha lixaad ee *Abaalmarinada Madadaalada iyo Waxbarashada (ASPIRE)* ee Atlanta. Waxaa martigeliyay Ururka Mareykanka ee Adapted Sports Programs, Inc. (AAASP), Abaalmarinada ASPIRE waxay aqoonsataa shaqsiyaadka iyo ururada sameynayo wax ku biirinta wax ku oolka ah ee ciyaaraha la qabsiga oo dalkoo dhan.

“Waxay i dareensiisaa fiicnaan inaan ku guuleysto abaalmarinta sababtoo ah waxaan dhabtii dareemayaa sida inuu i arkay qof walba,” waxaa yiri Najee. “Helitaanka abaal marintaas waxay iigaga dhigantahay wax badan aniga sababtoo ah waxay muujisaa inta [AAASP] ay dhab ahaantii daneyso, oo way garanayaan waxa aan sameyn karo.”

Tan ma ahan waqtiga ugu horeeyay oo la aqoonsaday kartida Najee. Sannadkii la soo dhaafay, wuxuu helay abaalmarinta Ciyaaraha Sannadka Ragga ee 2023 ASPIRE oo Horyaalka Ciyaaraha AdaptED.

Safarkiisa ciyaaraha wuxuu ku bilwoday da'da lix sanno jirka markii qof uu ogeysiiyay xawaarahiisa cajiibka ah oo wuxuu ku dhiirogeliyay inuu ku soo biiro kooxda kubada koleyga kursiga curyaanka DeKalb Silver Streaks. Kooxda waxay ka qeyb tahay a baRNAamijka ciyaaraha la qabsiga Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb.

“Taas waa sida aan u bilaabay, oo waan jeclaa tan iyo markaas,” ayuu yiri.

Madaxa tababaraha Silver Streaks Delton Schoates wuxuu dib u xusuustaa inuu Najee ahaa canug firfircoon oo isla markiiba jeclaaday ciyaarta.

“Wuxuu jeclaa ka mid noqoshada kooxda. Kooxo badan oo aan ciyaarno ayaa jaclaaday canugaan yar ee qurxoon oo kor iyo hoos ugu socdo garoonka,” Tababare Schoates ayaa yiri. “Mararka qaar wuxuu u gashan jiray funaanadiisa gadaalgadaal, oo waxay u noqotay calaamad uu leeyahay.”

Kaaliiyaha tababaraha Everette Schoates ayaa ammaanay awooda Najee ee uu ku barto kuna hogaamiyo.

“Wuxuu marwalba lahaa rabitaan uu wax ku barto, oo ma jirin wax uusan isku dayi karin inuu sameeyo,” ayuu yiri. “Najee wuxuu noqday tababare ciyaartoy. Wuxuu tababari karaa kooxda, maareyn karaa weyn, hakin karo, garanayo ciyaarta, oo garanayo sharciyada ciyaar walba.”

Markii gubashada cagtiisa bidix ay ku caabuqday da'da sagaal sanno jirka, taasoo keentay lug ka goynta hoose, Najee wuu diiday inay tan dib u dhigto. Badelkeediii, wuxuu baolaariyay dabagaladiisa ciyaaraha, taasoo noqotay ciyaartoy ciyaaro badan oo ka qeybqaadanayo kubada koleyga korsiga ciyaartoyda, kubada cagta kursiga curyaanka, kubadda gacanta kursiga curyaanka, iyo orodka iyo garoonka.

Waxqabadkiisa gaarka ah ee kubada gacanta ee kursiga curyaanka ayaa soo jiidatay indhaha Kooxda Kubada gacanta ee Kursiga Curyaanka Qaranka Mareykanka. Waxaa laga casuumay inuu isku dayo, Najee wuxuu sameeyay liiska 10-qof, isagoo noqday ciyaaryahanka ugu da'da yar ee kooxda. Gudaha Sebteembar, wuxuu ula safray kooxda Masar si uu ugu tartamo [Horyaalka Caalamiga ah ee Kubada gacanta Kursiga curyaanka ee Ururka Kubada gacanta Caalamiga ah \(IHF\)](#). Najee iyo kooxda waxay ku soo laabteen gurigoodii iyagoo wata biladdii qalinka—tii ugu horeysay kooxda qaranka.

“Runtii aad ayaan ugu riyaaqay inaan caawiyo kooxdeyda oo aan kula farxo markii aan dhinacooda taagnaa,” ayuu yiri.

Ardayga sannadka koowaad ee Dugsiga Sare ee Grayson ee Gobolka Gwinnett, Najee wuxuu qorsheynayaa inuu ka qeybgalo kulliyada oo sii wato xirfadiisa ciyaaraha. Wuxuu tixgelinayaa Jaamacada Auburn, Jaamacada Alabama, iyo Jaamacada Wisconsin-Whitewater. Kulliyada kadib, wuxuu haminayaa inuu isku dayo Kooxda Kubada Koleyga Kursiga curyaaminta Ragga ee Mareykanka oo uu u sii wato u ciyaarida kooxda kubada gacanta ee qaranka.

Najee wuxuu rajeynayaa guulahiisa inay dhiirogeliso dadka kale ee wajahayo caqabadaha la midka ah.

“Ha u ogolaan in qof walba kuu sheego inaad sameyn karin wax,” ayuu yiri. “Isku day oo haka niyad jabin.”

Iyo go'aan gaar ah iyo ruuxa, Najee Smothers kama adkaanayo kaliya caqabadaha hore—wuxuu ku dhiirogelinayaa dadka kale inay sidaas oo kale sameeyaan, isagoo cadeynaya inaysan jirin riyo aan la gaari karin.